

## DAAWADAADA: Lisinopril \_\_\_\_ mg

**Maxaan u qaadanayaa daawadan?** Waxaad leedahay dhiig kar. Dhiig karku waa halis hadii aan la iska daawayn. Wuxuu sababi karaa faalig iyo wadno xanuun. Waad u dhiman kartaa dhiig karka hadii aan lagaa daawayn.

**Qaado 1 kiniin ah intaanad waxba cunin aroor kasta.** Waxba ha cunin ka hor inta aanad liqin kiniinka.

**Maxaan dareemi doonaa markaan qaato daawadan?** Mararka qaarkood waxaad dareemi kartaaa saamayn ay kugu keento daawadu. Saamayntu waa wax iska caadi ah hadaad dareento. Saamaynta qaarkood waxay dhacaan markii jirkaagu aanu la qabsan isticmaalka daawada waxaana ku jiri kara qufac, wareer, madax xanuun, lallabbo iyo shuban.

Saamaynta qaarkood ma dhacaan hadayse dhacdo waa halis. **Wac 911 ama aad qolka gargaarka degdega ah isla markiiba haddii aad isku aragto: finan; wajiga, dibnaha, carrabka, ama cunaha oo barara; dhibaato xagga neefsashada ah, lallabbo/matag aan joogsanayn; calool xanuun daran ama calool xanuun; kaadi cas.**

**Maxaa kale ee aan u baahanahay inaan ogaado?**

1. Waa inaad qaadato daawadan maalin walba xataa hadaad caadi dareento.
2. Waa inaad dib usoo qaadataa daawadan bil kasta.
3. Ha cabin wax aalkalo ah. Cab biyo badan.
4. Hadii aad booqato xafiiska dhakhtar kale, xarun caafimaad, ama qolka gargaarka degdega ah, u sheeg inaad leedahay dhiig kar oo aad qaadato daawada Lisinopril.
5. Hadii aad uurleedahay, jooji qaadashada daawadan hada. Kusoo noqo xarunta caafimaad ee Grace Village Medical Clinic si aad ula kulanto dhakhtarka oo kuugu raadiyo daawo kale oo dhiig karka oo aad qaadato.

“Macluumaadka ku jira halkan waxa loogu talo galay kaliya ujeedooyin macluumaad loomana qaadan karo talo khubaro caafimaad ahaan. Markasta weydii talada dhaktarkaaga ama adeeg bixiye daryeel caafimaad oo ku haboon wixii su’aalo aad ka qabtid xaalad caafimaad ama daaweyn.”